



DIGNIIN: Hargabka Shimbiraha ee aad u Faafa

Hargabka shimbiraha ee aadka u faafa (Highly pathogenic avian influenza (HPAI)), H5N1, ayaa la xaqiijiyay in laga helay Maraykanka 2022. Waxaa keenay shimbiraha duurjoogta ah ee guuraya, H5N1 waxay ku fidin doonaan socdaalka gu'ga, waxayna saamayn kartaa dhammaan digaaga/shimbiraha la dhaqdo: kooxaha yar ee magaalada iyo kuwa warshadaha ganacsiga.



Iskaangaree si aad u hesho macluumaadka ku saabsan hargabka shimbiraha

Digaaga qaba HPAI kama badbaadaan jirrada. Tallaalka HPAI si diyaar looma heli karo.

Calaamadaha Hargabka Shimbiraha

- Dibreeshin aad u daran
- Aad u aamusnaan
- Neefsashada oo ku adag
- Hoos u dhaca wax cunista ama cabista
- Barar ama midab casuus ah oo madaxa, xirimaha, dhoorka, macasha, iyo jiqillada ah
- Yaraanta in ay dhalaan ukunta
- Dhimasho lama filaan ah oo aan la garanayn biyaha

Biosecurity (Badbaado-nololeedka) ayaa ah fursadaada ugu fiican si aad uga hortagto HPAI inay soo gasho digaaga yar ama digaaga magaalada.



Waa kuwan waxyaabo aad samayn karto:

Iskaangaree si aad u hesho talooyin dheeraad ah oo ku saabsan badqabka noolaha

Ka ilaali Kooxda Shimbirahaaga ee yar Hargabka Shimbiraha

- 1 Iska ilaali in gurigaagu soo jiito shimbiraha duurjoogta ah iyo shimbiraha biyaha. Shimbiraha yaryeyda (Songbirds, sparrows, starlings), iwm. khatartoodu waa yartahay.**

Dabool oo xir meelaha quudinta ee dibadda.

✓ Weel ku hay quudinta.

Ku quudi digaaga gudaha xeradooda.

Nadiifi raashinka quudinta ee daata.

Yaree biyo batalaqsiga iyo biyaha taagan.

Iska ilaaliya booqashada balliyada iyo durdurrada, gaar ahaan idinka oo wata xayawaanka rabaayada ah.
- 2 Xaddida ama joojiya u kaxaynta shimbirahiina iibka, bandhigyada iyo meelaha isdhaafsiga.**

Hubi in ay nadiifi yihiin gacmahaagu, dharka iyo kabuhu kahor intaadan taabanin shimbirahaaga haddii aad ka qaybgasho munaasabado. Ha u ogolaan dadkale inay taabtaan shimbirahaaga.
- 3 Yaree dadka soo booqanaya shimbirahaaga.**

Haddii ay qasab tahay in qof uu soo booqdo shimbirahaaga,

 - Ka wada hadla meelihii kale ee ay soo mareen.
 - Ha maydhaan gacmahooda oo ha xirtaan dhar iyo kabo nadiif ah.

Wac dhakhtarkaaga xoolaha haddii shimbirahaaga ay ka muuqdaan calaamadaha hargabka ama aad ka shakisantahay inuu soo gaaray. Ma lihid dhakhtarka xoolaha? Ka wac Shaybaarka Baaritaanka Digaaga ee Minnesota (Minnesota Poultry Testing Laboratory) 320-231-5170.

UNIVERSITY OF MINNESOTA EXTENSION

MINNESOTA BOARD OF ANIMAL HEALTH